



# Goorma ayaa la rabaa in carruurta xanuunsanaysa lagu hayo guriga oo aanay tegin xannaanada iyo iskuulka carruurta?



## 1. Ilmahaaga ma ku dhaceen qandho, qufac, cune-xanuun ama sanko oo cabudhsan 24-kii saacadood ee u dambeeyey?



Waa in ilmuhu joogo guriga.

Haddii ilmuhu xanuunsado ama aad ka werwerto caafimaadkiisa waxa aad xidhiidh la samayn kartaa dhakhtarkiisa ama isbitaalka degdegga ah (legevakt).

## 2. Ilmahaagu weli ma xanuunsanayaa 48 saacadood kadib?



**HAA**

Wac dhakhtarkiisa ama isbitaalka degdegga ah haddii xaaladda ilmuhu ka soo roonaan weydo.

Dhakhtarka ayaa go'aamin doona in tijaabo laga qaadayo ilmahaaga.




**MAY**

Ilmuhu wuxuu aadi karaa iskuulka ama xannaanada marka aanu lahayn qandho isla markaanaa laga dareemayo inuu caafimaad qabo.

Ma loo baahna in ilmaha laga qaado tijaabada covid-19.

Ilmuhu waxa uu aadi karaa iskuul ama xannaano inkastoo uu leeyahay duuf yar ama xabeeb / qufacayo wax yar.

## 3. Tijaabada covid-19 ma laga qaadayaa ilmahaaga?



**HAA**

Waa in ilmuhu joogo guriga ilaa iyo inta aad helayso jawaabta tijaabada.




**MAY**

Ilmuhu wuxuu aadi karaa iskuulka ama xannaanada marka aanu lahayn qandho isla markaanaa laga dareemayo inuu caafimaad qabo

Ilmuhu waxa uu aadi karaa iskuul ama xannaano inkastoo uu leeyahay duuf yar ama xabeeb / qufacayo wax yar

## 4. Ilmahaagu ma qabaa covid-19?



**HAA**

Waa in ilmuhu joogo guriga. Maamulka degmada ayaa kuu sheegi doona xeerarka/ tilmaamaha la rabo in qoyskiinu ku dhaqmo marka ilmuhu xanuunsanayo.



**MAY**

Ilmuhu wuxuu aadi karaa iskuulka ama xannaanada marka aanu lahayn qandho isla markaanaa laga dareemayo inuu caafimaad qabo

Ilmuhu waxa uu aadi karaa iskuul ama xannaano inkastoo uu leeyahay duuf yar ama xabeeb / qufacayo wax yar

## La xidhiidh dhakhtarkiisa ama isbitaalka degdegga (legevakt) haddii ilmuhu qabo hargab oo isla markaana:

- Ilmuhu awoodin ciyaarta iyo inuu ka qaybgalo hawlaha.
- Haddii ilmuhu dareemayo qandho, jidhka oo xanuunaya, rabitaanka cuntada oo xun, daal, lalabo, ama wareer.
- Neefsashadu ku adagtahay ilmaha iyo/ama u neefsanayo si degdeg ah oo aan caadi ahayn marka aanu samaynayn dhaqdhaqaaq.
- Xasuuso in carruurta yaryar aanay sheegi karin dhibta haysta, laakiin waxa laga lagu arki karo cabasho, inay ku qabqabsadaan ama xanaaq.